

Cudurka Fayraska Powassan Encephalitis

Xaashida xaqiiqada



Cudurka fayraska powassan encephalitis waa cudur dhif iyo naadir ah oo uu fayras keeno. Waxaa lagu kala qaadaa qaniinyada shillinta *Ixodes* ee cudurka qabta



Qof kasta ayaa qaadi kara fayraska fayraska Powassan, balse dadka wakhtiga ku qaata guriga bannaankiisa ayaa halis sarreysa ugu jira.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho



Madax-xanuun



Qoor/Luqun Xanuun



Daciifnimo



Jahwareer



Hadal La'aan

Calaamadaha iyo astaamaha badanaa waxay bilawdaan hal isbuuc ilaa hal bil kadib marka ay dhacdo qaniinyada shillinta cudurka qabta. Calaamadaha iyo astaamaha waxaa sidoo kale ka mid noqon kara isdhex-yaac iyo suuxdin. Dad badan oo qaba cudurka Powassan ma yeeshaan wax astaamo ah. Fayraska Powassan wuxuu keeni karaa barar maskaxeed iyo bararida agagaarka maskaxda. Qiyaastii kala-bar ka mid ah dadka ka badbaaday cudurka waxay qabeen dhaawac maskaxeed oo joogto ah oo qiyaastii mid ka mid ah tobankii qofba wuu u dhimanayay.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan ama astaamahan kadib marka ay shillin ku qaniinto. Cudurka Powassan waxaa lagu ogaadaa oo lagu saleeyaa calaamadaha iyo astaamaha waxaana lagu xaqiijiyaa baaridda dareeraha laf-dhabarta ama dhiigga. Ma jirto daaweyn gaar ah oo loogu talagalay cudurka Powassan oo jirrada daran ayaa waxaa ku jiri kara taageero daaweyn oo lagu dhex qaato isbitaalka.


Kahortag fayraska Powassan Encephalitis

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo fayraska Powassan waa inaad iska ilaalisaan adiga iyo qoyskaaga inay shillin idin qaniinto.



Isticmaal sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen ee maqaarka/jirka loogu talagalay sida:


- Sunta DEET
- Saliida Lemon Eucalyptus
- IR 3535
- Sunta Picaridin



Xiro shaar gacmo-dheer ah iyo surwaal lugo dheer markaad bannaanka joogto. Iskaalshahaaga ka soo kor mari surwaaladaada oo shaadhkaagana geli surwaalkaaga.



Jar cawskaaga oo iska xaaq caleemaha.



Si maalinle ah u samee hubinta shillinta oo sidoo kale hubi rabaayadahaaga.

Hababka kahortagga ee dheeraadka ah waxaa ka mid ah isticmaalka kareemka iyo sunta cayayaanka ee dharka ee permethrin.

Si Ammaan leh u saarista Shillinta



Isticmaal qaaddada shillinta ama birqabadka shillinta si aad shillinta uga saarto gurigaaga.

-Adigoo isticmaalaya birqabad, kaga qabo shillinta afka oo isticmaal caddaadis joogto ah si aad shillinta uga saarto gurigaaga. Ha isticmaalin dhaqdhaqaaqyada xagaldaacinta leh.

-Adigoo isticmaalaya qaaddada shillinta, isku aadi afka qaaddada iyo madaxa shillinta oo si tartiib ah ugu soo qaad.

Ha isticmaalin ciddiyaha, taraq, ama fasliin si aad shillinta uga saarto gurigaaga. Hababkani waxay kordhiyaan halista caabuqa maqaarka ee jirka ku faafa.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/powassan
2. www.cdc.gov/powassan
3. www.maine.gov/dhhs/tickfaq (Si aad uga hesho su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee shillinta)
4. www.epa.gov/insect-repelents/find-repelent-right-you (Si aad u ogaato sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen)
5. www.ticks.umaine.edu (Si aad u soo gudbisno shillinta si loo aqoonsado loona baaro)

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.